



Wa' a'yo dadka kijad dhan iyo alaabta guriga isku xidhi ama kala furfuri karo? Qofkee a'yaa si xirfad leh guuritaanka oo meel kale loo guura'yo si fiican u qorsheyn yaqaano? Yaa keeno alaabta guriga xitaa alaabto dhan? Qofkeeba kari karo inuu kariyaha iyo qasaaladda si saxsan iyo la isku halayn karo u rakibo? Yaa alaabtooda isku xidh-xidha'yo haday dadkii guura'yay intaa keligood samayn karaynin? Shaqaalaha xirfadeysan ee adeega rarinta alaabta guriga iyo kijadda waa qof si fiican u yaqaano waxyaalaha ku saabsan rarida alaabta guriga.

Shaqaalaha xirfadeysan ee adeega rarinta alaabta guriga iyo kijadda (Fachkraft für Möbel-, Küchen- und Umzugsservice)

Maclumaadka shaqada:

Hadaad tahay shaqaalaha FMKU xafiiska kama shaqaynaysid. Shaqaale ka shaqayna'yo sharkada alaabta guriga rarto (Möbelspedition) wuxuu rara'yaa reer dhan gurigood, sharkad alaabtood, alaabtii dhakhtarka, shaybaar dhan ama xitaa matxaf. Waxay noqon kartaa magaalo gudaheed meel kale loo guura'yo, dalka Jarmanka ama xitaa dal kale loo kala guura kala guura'yo. Weliba shaqaalaha rarida alaabta guriga iyo kijadda waxay alaabta u raraan sharkadaha alaabta guriga iibi'yaan ama waxay u gee'yaan macmiishoda alaab ka iibsaday.

3da sano tobabarka socdo waxa lagu barana'yaa sida lo isticmaalo qalabyadda iyo alaabta kale shaqaalada ku shaqee'yaan, sida alaabta guriga la isku xidh-xidho iyo sida alaabta laga soo raro guriga keydinta lagu ha'yay ilaa meeshi loogu talagalay..Waxaana ka mid ah in looxa lagu shaqayn karo korontada la isku xidhi karo iyo in qori karo resiiddhadh iyo dokumentiyada alaabta la rara'yo.

Shuruudaha:

Haddii la doona'yo in la noqdo Shaqaalaha xirfadeysan ee adeega rarinta alaabta guriga iyo kijadda qofka wa xoogii shaqadaa ku filan lahaada.

Sharkahda waxay raadina'yaan codsade'yaal farsamada shaqada gacmeed yaqaanaan, macmiisha si fiican ula maciimalo, la isku halayn karo iyo jecel inuu **shuqul ku yeesho dad kale**.

Mushahar:

Tababare'yaasha sanadaha la tobabara'yo waxay hela'yaan mushahar kolba loo dalaca'yo. Sanadka ugu horee'yo tobabara'yaasha shaqaalaha FMU waxay helaan qiyaas ahaan 650 €. Laakiin sharkadaha wey kala duwan yihiin, waxayna ku saabsan tahay heshiisyada jiro

Maclumaadka shaqadaa ma danaynaysaa? Waxa codsad loo dira karaa 500 sharkadaha raro alaabta guriga oo ka jiraan Hamburg iyo agagaarkeeda! Maclumaad kale waxaad ka helayaas www.logistik-lernen.hamburg.